

Barnaamijyo lacag la'aan ah oo loogu talagalay saddex sano jirrada

Haddii ilmahaaga saddex sano jirka ah uu yahay Aboorjiin ama Torres Strait Islander ama laga taageero Ilaalinta Ilmaha ama Child FIRST, waxay xaq u yeelan karaan ilaa 15 saacadood oo barnaamijka kindhaha oo lacag la'aan ah ama qarashkiisu hooseeyo. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg www.education.vic.gov.au/childhood/parents/kindergarten/Pages/earlystart.aspx

Deeqda fidinta Kindhaha Bilowga Hore

Haddii ilmahaaga lagu qiimeeyo the Early Start Kindergarten (Kindhaha Bilowga Hore) ama barnaamijka Access to Early Learning (Helidda waxbarashada Hore) ee sannadkii hore, Waxaad xaq u yeelan kartaa Deeqda fidinta Kindhaha Bilowga Hore. Deeqdada fidinta waxay khuseysaa duruufaha halkaas oo Kabidda Ujradka Kindhaha aysan khuseyn waxayna awoodsiinaysaa in ilmahaagu dhigto barnaamijka kindhaha oo la maageliyo oo lacag la'aan ah ama qarashkiisu hooseeyo.



Adeegyada laba-luqadaha iyo turjumaanka

Adeegga kindhaha ilmahaaga wuxuu heli karaa adeegga lacag la'aanta ah ee turjumaanka si loo caawiyo inuu kaala hadlo wax ku saabsan baahi-yaha ilmahaaga adigoo wacaya **9280 1955**.

Shaqaalaha dejinta waxay kaloo caawin karaan qoysaska qaxootiga ah si ay u helaan barnaamijka kindhaha.

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada kindhaha ama kabidda ujradda kindhaha ka eeg website-ka Department of Education and Training oo ah www.education.vic.gov.au/childhood/parents/kindergarten/Pages/fees.aspx ama la xiriir Xafiiska Go-bolka ee kuugu dhow.

Xiriirada Xafiisyada Gobollada

Xafiisyada Gobollada	Goobta	Switchboard-ka
Waqooyi-Bari Victoria	Benalla	03 8392 9500
	Glen Waverley	03 8392 9300
Waqooyi-Galbeed Victoria	Bendigo	03 5440 3111
	Coburg	03 9488 9488
Koofur-Bari Victoria	Dandenong	03 8765 5600
	Moe	03 5127 0400
Koofur-Galbeed Victoria	Ballarat	03 5337 8444
	Geelong	03 5225 1000
	Footscray	03 8397 0300

Waxaa diyaariyey:
Department of Education and Training
2, Treasury Place, East Melbourne
Melbourne 3002
© State of Victoria August 2015

Kindhaha lacag la'aanta ah ama qarashkiisu hooseeyo.

Kindhaha Lacag La'aanta ah oo La-kabo
Somali Translation



Kindhaha waa tallaabo muhiim u ah carruurta. Ayagoo soo mara kindhaha carruurta waxay bartaan xirfado ay yeelanayaan noloshooda oo dhan.

Barnaamijka kindhaha waxaa bixiyo barayaasha carruurnimada hore iyo tababareyaal tababaran.

Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in bar-naamijyada kindhaha ay hagaajiyaan caafimaadka iyo ladnaanta carruurta, natiijadiisuna bulshadeed iyo waxbarasho waxayna carruurta u diyaariyaan u-gudbidda dugsiya.

Carruurta waxaa lagu qori karaa barnaamijka kindhaha haddii ay ugu yaraan afar sano jirro yihiin 30ka Abriil sannadka ay tegi doonaan barnaamijka kindhaha.

Baraha kindhaha ee ilmahaaga ayaa kula shaqayn doona si loo taageero waxbarashada ilmahaaga.

Halkan Victoria, barnaamijyada kindhaha ee tayada leh waxaa laga bixiyaa xaruumaha daryeelka maalinta oo dhan ah, kindhayaasha bulshada iyo dugsiyada qaarkood.

Kabidda ujradda kindhaha

Ilmahaagu wuxuu xaq u yeelan karaa kindhaha lacag la'aanta ah ama qarashkiisu hooseeyo taas oo qayb ka ah ballan-qaadka Dowladda Victoria si ay u siiso carruurta oo dhan helitaanka barnaamij kindho oo tayo sare leh sannadka ka horreeya Bilowga dugsiya.

Kabidda ujradda kindhaha waxay siisaa carruurta afar-sano-jirada ah inay helaan barnaamijka kindhaha ilaa 15 saacadood asbuuciiba.

Ilmahaygu ma u xaq leeyahay kindhaha lacag la'aanta ah ama qarashkiisu hooseeyo?

Ilmahaagu wuxuu u xaq yeelan doonaa inuu helo kindhaha lacag la'aanta ah ama qarashkiisu hooseeyo haddii uu ku jiro duruufahan soo socda:

- Ilmahaaga in loo aqoonsaday waalid, daryeele ama ilaaliye sharciyeed iyo inuu yahay Aboorjiin ama Torres Strait Islander.
- Ilmahaaga oo loogu aqoonsaday shahaadada dhalashadooda inay yihiin ilmaha mataanaha ba-dan ah (saddexleyaal ama afarleyaal)
- Ilmahaagu inuu haysto, ama uu qabo waalid ama ilaaliye kaas oo haysta, mid ka mid ah waxyaalaha soo socda:
 - Kaarka Daryeelka Caafimaadka ee Common-wealth-ga
 - Kaarka ka-dhaafidda Howgabka Common-wealth-ga
 - Kaarka dahabiga ah ee Department of Veterans' Affairs ama kaarka Cad
 - Inuu xaq u leeyahay ama Fiisada Magangelyo Doonka



Sidee baan u codsadaa?

Waxaad kala hadli kartaa shaqaalaha Adeegga kindhahaaga wax ku saabsan xaq-u-yeelashada ilmahaaga, waxaadna tusaale kaarkaaga ka-dhaafidda, fiisadaada, shahaadada dhalshada ama dokumantiga khuseeya oo kale.

Kindhaha ilmahaaga ayaa kuu codsan doonta uj-radda kabidda ayadoo ku matalaysa. Lacag-bixinta waxaa lagu aadin doonaa Kindhaha ilmahaaga taas oo awoodsiinaysa ilmahaaga inuu ku helo barnaamij tayo-sare leh oo lacag la'aan ama qa-rashkiisu hooseeyo.

Waxaad codsan kartaa kabidda ujradda kindhaha mar kasta inta lagu jiro sannadka, xataa haddii il-mahaagu u wareego kindho kale.

Sidee baan kindhaha ugu helaa ilmahaaga?

Si loo daboolo baahiyaha qoysaska gaarka ah, barnaamijyada kindhaha waxaa lagu bixiyaa qaabab dhowr ah oo kala duwan oo ay ka mid yihiin xaruumaha daryeelka maalinta oo dhan ah, kindhayaasha bulshada iyo dugsiyada qaarkood.

Si aad uga hesho Adeegga kindhaha ee de-gaankaaga ka eeg www.education.vic.gov.au/findaservice/Home.aspx ama la xiriir degmada degaankaaga. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka ee degmada de-gaankaaga adiga oo ka eega www.dtpli.vic.gov.au